



Ku soo-dhowoow weebka Lära svenska!

Lära svenska waa bar-internet oo lacag la'aan la adeegsan karo. Waxaad barta ka heleysa fursad aad luqadda ku barato. Waxaad kaloo ka heleysa fursadda laylinta luqadda iyo daawasho filimmo. Waxaad barta ku booqan karta adigoo adeegsada kombyuutarkaaga, pad-kaaga ama mobaylkaaga. Haddii mobayl ama kombyuutar aadan haysan waxaad booqan karta maktabad oo aad kombyuutarkooda ku isticmaasho.

Gal internet kaddib halka adreesyada lagu qoro ku qor "www.larasvenska.se".

Weebka ugu horeeyo

Markii aad soo gasho barta Lära svenska, waxaad kala dooran karta afar weeb oo kala duwan oo ku qoran duruusta barashada luqadda lagu layliyo oo kala heerar ah.




Bilaaw barashada iswiidhishka

» Waxaa loogu tala galay adigaaga billawga ah oo doonaya in aad billawdid. Weebka "Bilaaw barashada iswiidhishka" waxaad ku baranaysa ereyada iyo odhaahyada af-iswiidhishka oo asaasiga ah.



Sii baro iswiidhishka


» Для тех, кто хочет упражняться больше и продвинуться дальше. Weebka "Sii baro iswiidhishka" waxaa laga hela fursadda laylinta iyo filimmo loogu talagalay qofka adigoo kale ah, oo doonaayo in u barto ereyada iyo jumladaha af-iswiidhishka ee ugu dhibka badan.



La jirka kuwa kale ku tababaro swiidhishka

» Halka aad deggantihid ama taleefanka gacanta ka hel dad aad swiidhishka kula tababaratiid.

Haddii aad adeegsato Weebka Weebka "La jirka kuwa kale ku tababaro swiidhishka" waxaad heleysa fursad aad xiriir kula yeelato dadyoow af-iswiidhish ku hadla, oo ka caawinna barashada af-iswiidhishka.



Liisas erayo iyo turjumid qoraal ah

» Qaamuusyo iyo liisas erayo oo xaalado kala duwan ah.

Weebka "Liisas erayo iyo turjumid qoraal ah" waxaad ka heleysa xiriiriyeyaasha bogyada qaamuusyaada laga helo, waxaan halkaas ka heleysa fursad aad ku hesho macnaha ereyada iyo weeraha. Waxaad kaloo ka heleysa liisas ku qoran ereyo aad noolol-maalmeedyada adeegsan kart.

Qaabka weebka "Lära svenska" loogu isticmaalo

- » Sameeynta laylinta iyo daawashada filimada Lära svenska sida aad doonto ayaa u kala horumari karta..
- » Sida aad ugu soo noqonoqto dhagaysashada ereyda, waxaad hakad gelin karta filimka kaddib dib u celin karta cajaladda.
- » Weebka Lära svenska waxaad ka heleysa xiriiriyeyaal kugu xira weebyo kale. Markii aad xiriiriyee noocaas ah jag-siiso waad ka baxaysa weebka Lära svenska.

Weebka Lära svenska wuxuu ka mid

yahaay weebyada www.informationsverige.se

www.informationsverige.se waxaa maaamula hay'adaha dowladda, waxayna ku qoran yihiin luqado kala duwan waana lacag la'aan. Waxaa halkaas ku qoran warbixin ku saabsan dalka Iswiidan oo muhim ah oo loogu talagalay qofka dalka Iswiidan dhowaan yimi. Warbixinada waxaa kamid ah hab-shaqaynta guryaha dalka Iswiidan, hab-shaqaynta xarumaha daryeel-caafimaadeedka, hab-dhiska dugsiyada ama sida shaqo ama waxbarasho loo helo.